



---

**KU: Malaaqyada Digil Iyo Mirifle**

**Og: Guddiga Farsamada Soo Xulista Parlamaanka**

**Og: Saxiixayaasha Qariirada Nabada;**

**Taariikh: 28 July 2012**

**CABASHO KA DHAN AH GO'AANKA MALAAQ XASAN SHURE MAXAMUUD**

Anagoo ah waxgaradka, aqoonyahanada, odayaasha, samadoonada, culumaa'udiinka, dhalinyarada iyo dumarka beesha Hubeer waxaan ka cabaneynaa go'aankii Malaaq Xasan Shure kaligiis ku gaaray inuu ku magacaabo shaqsi aan taageero iyo kalsooni toona ku laheyn qeybaha kala duwan ee ay beesha ka kooban tahay iyo deegaanada ay beeshu degto. Sidoo kale waxaan aad uga biyo diidsan nahay in beesha Hubeer lagu juujuubo ama dusha looga keeno xubin aysan raali ka aheyn, horeyna ugu fashilintay xilkii loo ikmadey isla markaasna ku sifoobey iska horkeenida beesha iyo wax-qabad-xumo baahsan. Marnaba beeshu raali kama noqon doonto mana taageeri doonto in cadaalad daro iyo nin jecleysi lagu abaalmariyo shaqsi leh sifooyinkaas kore oo weliba horey ugu fashilmey howshii dalka iyo beeshu ka sugeysey in ka badan 8 sano oo uu xildhibaan ahaa.

Dhammaan beesha Hubeer ee gudaha iyo dibadaba waxay talo ay u dhan yihiin ku soo jeediyeen in la helo isbedel, isla markaasna kula taliyeen Malaaqa Xasan Shure in aan dib dambe loo soo celin xubintaas kor ku tilmaaman, fursadna la siiyo xubnaha kale ee leh karti, aqoon iyo hogaamin ay ummada soomaaliyeed guud ahaan iyo beesha uu matalaayo ka sugeyso.

Sidaas darteed, la tashiyo badan ka dib, dhammaan qeybaha kala duwan ee beesha Hubeer waxay xildhibaan u soo gudbisay in uu matalo **Eng Hashim**

**Abdullahi Abdi Waraabe**, oo ah shaqsi beesha Hubeer isku wada raacdsan tahay lehna karti iyo aqoon hogaamineed.

Haddaba, waxaan halkaan ku cadeyneynaa in go'aankii kaligiis uu qaatay Malaaq xasan Shure uusan cidna kala tashan, dhammaan beesha qeybaheeda kala duwanna ay diidan yihiin aqoosanna doonin xubintaas xaqdarada laga keeney, waxayna beesha u aragtaa mid ka hor imaaneyso mudnaansiinta talada iyo rabitaanka inta badan beesha Hubeer iyo masuuliyadii dhaqanka beesha. Waxaan mar kale ka digeynaa nin jecleysi, isla markaasina waxaan Malaaq Xasan Sure fareynaa in sida ugu dhaqsiiyaha badan uga laabto go'aankiisa kali talisnimo ee u ku magacaabey shaqsi horey ugu fashilmey xilkii 8da sano ee uu beesha magaceeda ugu matalaayey Barlamaanka Qaranka Soomaaliyeed.

Ugu dambeyntii, waxii dhibaato ah ee ka yimaada magacaabistaas aan lagala tashan beesha masuuliyadeeda waxaa dusha u ridan doona Malaaq Xasan Shure oo caado ka dhigtey kali talisnimo, nin jecleysi iyo cadaalad daro beesha dhexdeeda ah. Waxaan markastaa soo dhaweyneynaa beel ahaan in la helo cadaalad, lagana fogaado kali talisnimo, ninjecleysi, masuqmaasuq, isla markaasna danta guud ee beesha iyo tan qaranka soomaaliyeed laga hormariyo danta gaarka ah, si looga hortago isqabqabsi iyo loona helo nabad waarto gudaha beesha iyo guud ahaan Somalia.

### **Wa bilaahi Towfiq**

Xubnaha Beesha Hubeer :

#.	Magaca
01.	Nabadoon Cabdikariim Diyaad
02.	Samaan Maxamed Daahir
03.	Madkariim Maxamed Iftiin
04.	Buukaay Cali Aadan
05.	Ibrahim Maxamed Abdi
06.	Cabaas Cabdullahi Sheikh Siraaji
07.	Iftiin Maxamed
08.	Sheikh Xasan Makaa'il

09.	Macalim Janoow
10.	Axmed Maxamed Daahir
11.	Aadan Maxamed (Burji)
12.	Dr. Maxamed C/Rashid Kuusow
13.	C/laahi Maxamed Goos
14.	Nuur Aadan Maxamed
15.	Cabdisalaam Maxamed Daahir
16.	Cabdi Xuseen
17.	Maxamed Xasan Axmed
18.	Aweys Cabdinuur Axmed
19.	Cabdiraxmaan Maxamed Nuur
20.	Cabdiwaahid Xuseen Xasan
21.	Xuseen Maxamed Daahir
22.	Cabdishakur Aadan Maxamed
23.	Cabdinuur Cabdulle
24.	Cigaal Ibraahim
25.	Sahra Xasan Sheekh Nuur
26.	Madiina Aadan Maxamed
27.	Cabdi Salaad Udugeey
28.	Xasan Maxamed Xasan
29.	Nuur Xasan Nuur
30.	Cabdi Salaad Mukhtaar
31.	C/rashiid Maxamed Cabdi
32.	Ismaa'il Maxamed Madeey
33.	Cabdi Mudug Maxamed Axmed
34.	Xasan Macalin Xuseen
35.	Cadoow Shooboow Axmed
36.	Dhure Abaayle
37.	Ibraahim Sheekh Abuukar
38.	Cabdullahi Macalin Aadan
39.	C/qaadir Maxamed C/raxiin
40.	Yuusuf Maxamed Ibraahim
42.	Ciise Xasan Sheekh Nur
43.	Maxamed Xaaji
44.	Mustaf Xaaji Maxamed

45.	Prof. Xuseen Imaan
46.	Eng. Saadiq C/laahi Cabdi
47.	Cabdi Maxamed Kuusow (Cabdi Dheere)
48.	Saleymaan Buriko
49.	C/raxmaan C/laahi Xasan